

Jiheynta bulshada

- kooras ku saabsan Iswiidhen

Jiheynta bulshada waa waxbarasho ku saabsan bulshada iswiidhishka, ee loogu tala galay qofka ku cusub Iswiidhen.

Waxaad heleysaa aqoon ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaada ku saaran, sida dimuqraadiyadda iswiidhishku u shaqeyso iyo sida bulshadu u abaabulan tahay.

Kooraska ayaa ku siinaya warbixin muhim ah – bilow wacan ee Iswiidhen!

Wuxuu ku saabsan yahay waaqiciga nolol maalmeedka, tusaale ahaan su'aalaha ku saabsan:

- shaqada iyo waxbarashada
- degaanka
- caafimaadka iyo daryeelka bukaanka
- caruurta iyo reeraha

Warbarashada ayaa **ku baxeysa afkaada hooyo**. Waa maqal, su'aalo iyo dood.

Kooraska ayaa ka kooban 20 cashar, oo baxaya mar todobaadki. Waxaad fursad u heleysaa inaad doorato xiliyo kala duwan, xili maalinimo ama fiidki ah. Waxa kooraska la socdo booqasho wax barasho. Kooraska markaad dhameysato waxaad heleysaa shahaado.

Bilaash! Koorasku waa lacag la'aan!

Sideed mowduuc ee koorasku ka kooban yahay:

Imaatinka Iswiidhen

Ku noolaashaha Iswiidhen

La soo baxa biilkaada iyo horumar ka gaaridda Iswiidhen

Xuquuqda iyo waajibaadkaada saaran shaqsiga

Dhisidda reer iyo caruur ku heysashada Iswiidhen

Saameyn ku yeelashada Iswiidhen

Daryeelidda caafimaadkaada ee Iswiidhen

Ku gaboobidda Iswiidhen

Yaa dhigan kara kooraska? Sidee loo dalbadaaa?

Haddii aad goor dhow timid oo aad ka tirsan tahay qorshaha meeleynta (etableringsplan), waxa kooraska kuu dalbaya gacanyarahaaga xafiiska shaqada.

Haddii aad xiriir la leedahay addeegga bulshada, waxa kuu dalbki kara kooraska gacanyarahaaga.

FIIRA GAARA! Xataa haddii aad tahay qof ehel ahaan ku yimid dalka waad dhigan kartaa kooraska!

Adiga ayaa iska diiwaan gelin kara Waaxda jiheynta bulshada – eeg bogga xiga!

Nala soo xiriir haddii aad su'aal qabto!

Codsiga iyo xiriirka

Telefoon: 031-367 91 50

Meyl: samhallsorientering@socialresurs.goteborg.se

Warbixn intaa dheer ka aqriso: www.goteborg.se/samhallsorientering

Goobaheenu waxey ku yaalaan, Andra Långgatan 19 i Göteborg.

Jiheynta bulshada - waa furahaaga bulshada iswiidhishka

Ku soo dhowow Waaxda jiheynta bulshada (Enheten för samhällsorientering)!



Göteborgs Stad
Social resursförvaltning